




**Qof walba wuxuu
xaq u leeyahay i
nuu noolaad,
qof walbana wuxuu
noqon karaa
saaxiibka nolosha.**



Xog badan ka ogow
WAFriendsForLife.com

XAQIIQOOYINKA KU SAABSAN FENTANYL




**Inta badan dhimashooyinka ka dhaca
washington waxay ka dhashaan si
khaldan u isticmaalka fentanyl.**

**Inaad taqaano xaqiiqoooyinka
waxay naga caawin kartaa
badbaadada qof kale.**

WAXA LOO BAAHANYAHAY IN LA OGAADO

- Fentanyl waa mid awood badan, opioid si degdeg ah u falgala oo loo isticmaalo maayinta xanuunka.
- Fentanyl sharci leh (sharci ah) oo lagu isticmaalo goobaha caafimaadka.
- Fentanyl aan shariyaynayn (bilaa sharci) waa daawo wadada lagu iibyo, inta badan loo iibyo qaab qoraal bilaash ah oo kaniini ama budo ah. Waxaa mararka qaar lagu qasaa daawooyinka sida cocaine ama MDMA.
- Fentanyl waxay 50 jeer ka xooggan tahay heroin waxayna 100 jeer ka xooggan tahay morphine.



MAGACYADA WADOOYINKA EE FENTANYL

blues

30s ama M-30s

fenny ama fetty

percs

mexis

cayaarta
skittles

WAXYAABAHA KHATARTA GUUD AH

Qaar kamid ah da'yarta ayaa qaata fentanyl si ulkac ah. In badan oo kale ayaa si aan kas ahayn u qaata — si khaladan u qaadashada kaniiniyada been abuurka ah ee lagu dhax qariyay fentanylka ama Adderall, Xanax, ama Percocet si sax ah loo qoray.

Caafimaadka maskaxda

- Da'yarta wajahaysa welwelka, kurbada, ama niyadjabka waxay raadsan karaan kaniiniyo si ay isugu daaweyyaan waxayna u dhowdahay inay kaligood isticmaalaan.

Xanuunka

- Da'yarta qabta dhaawaca ama wajahaysa xanuuun jirka ah waxay raadsan karaan kaniiniyo ay isku daaweyyaan.

Cadaadiska bulshada

- Dhallintu waxay tijaabin karaan goobaha bulshada ayaga oo la socda saaxiibadooda oo cabsan, kaniiniyo isticmaalaya, ama isticmaalaya maandooriyeyaa kale.

DHIBAATOORYINKA FENTANYL IYO IYO SI KHALDAN U ISTICMAALKA KALE EE DAAWOORYINKA

Guddaha gobolka Washington iyo guud ahaanba Maraykanka, Fentanylka sharcidarrada ah iyo waxyaabaha kale ee awooddha badan ee la qabatimo ayaa ka dhigaya maandooriyaha wadooyinka laga helo kuwo aan sughayn waxyelo badanna gaysta.

Tirada dhalinyarada sida khaldan maandooriyaha u isticmaalaya ayaa korortay sannadihi danbe. Haddana, tirada guud ee carruurta Washington ee u dhintay si khaldan u isticmaalka fentanyl wali wey yara hoosaysaa. Xaqiiqada ayaa ah in inta badan da'yartu aysan si ulakac ah u baarin opioid-ka, oo ay kujirto fentanyl.

Wali, hal nolol oo la waayo ayaa aad u badan. Fentanyl waxay waxyeelaynaysaa dadka aan dadka ugu jecelnahay. Waa mid anaga na khusaysa inaan iska caawino sidii midkeenba kan kale u badbaadin lahaa.